PO BOX 11699
TACOMA WA 98411-669

Balanta Wareysiga Tartamaha

Date

Client's Name and Address

TTY / Lambarka TDD: 800-209-5446
Lambarka Bilaashka Laguwaco: 877-501-2233

Kaar Lambarka Aqoonsiga Macmiilka:

Qaaliga ahoow **Client's Name** :

Waxaan helnay arjigaaga **Date** . Waa inaad dhameystirtaa wareeysiga ilaa **Date** .

Saacadaha wareeysiyadeena waa isniinta ilaa jimacaha inta udhaxeeysa 8:00 a.m. and 3:00 p.m. marka laga reebo maalmaha fasaxa ee gobolka.

Fadlan nagasoo wac 1-877-501-2233 wareysiga ama si aad u fiirisid in xafiiska deegaanku u furan yahay wareysiyada shakhsiga ah.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa https://www.dshs.wa.gov/ oo raac linkiga soo socda "**Hel xafiis adeeg maxaliya**" warbixinaha adeegyada gaarka ah.

Hadii aanay ku wareysan **Date** , codsigaaga Caawimada ☐ Lacagta Cuntada Asaasiga ah ☐ waa la diidi doonaa.

Codsigaada ku aadan caawimaad waa ladiidi doona wareeysi la'aan.

Kani waa liiska waxyaabaha aad ubaahan karto ee quseeya wareeysigaada:

- Lambarada Amniga Bulshada ee dadka aad u codsaneyso
- Caddaynta muwaadinimada ama sharciga shisheeyaha sida sharciga baasaboorka Mareykanka, diiwaannada dhalashada, dukumiintiyada socdaalka.
- Caddaynta aqoonsiga sida sawirka kaarka aqoonsiga ID
- Caddaynta dakhliga sida koobiyada jeegagga, waraaqaha ama bayaannada kasocdo qof kasta oo reerkaaga lacag siiyey
- Caddeynta agabyada aad haysan kartid sida gaari kuudiiwaangashani, warbixinta xisaabta koontadaada ee bangiga, raasumaal, dammaanadda, sharciyada caymiska nolosha
- Caddaynta qarashyada daryeelka ilmaha ama daryeelka dadka waaweyn ee kugu tiirsan sida risiitka bixiyaha
- Caddaynta qarashka guryaha sida bixinta daynta guryaha, bixinta canshuurta hantida, caymiska milkiilaha guriga, rasiidyada kirada, koobiga heshiiska kirada, biilasha adeegga, warqad kasocoto milkiilaha guriga aad dagantahay
- Caddayn kale sida biilasha caafimaadka ee aan labixin, khidmadaha caymiska caafimaadka, isbedelada socdaalkaaga ama xaalada muwaadinimo, uurka iyo goorta lafilaya dhalmada, taageerada korsashada cunug ama bixinta daryeelka korinta

Waxaad awoodaa:

- Inaad codsato dheefaha, gudbisid dib u eegis, ama soosheegtid isbedelo halkaan www.washingtonconnection.org
- Noogu soo fakisgareey maclumaadka anaga halkaan 888-338-7410

Kuqor Kaargaaga aqoonsiga macmiilka ee ID-ga dhamaan koobiyada aad noosoodirto. Kaarkaaga aqoonsiga macmiilka ee ID-ga waa .

Si aad ulaxiriirto maamulaha kiiska ee WorkFirst ama adeegaha bulshada, wac 1-877-501-2233.

Wac 877-501-2233 si aad uxareeyso codsi ama dib u eegis, usheegto isbedelo, ama su'aalo uweeydiiso

Fadlan soo wac hadii aad qabto wax su'aal ah oo kusaansan warqadaan.

Lifaaqyada (yada): DSHS 14-113 Xuquuqaha Macmiilka iyo Mas'uuliyadaha

Washington State Department of Social & Health Services — Transforming lives	**Mas'uuliyadahaaga iyo Xuquuqahaaga ee Gargaarka Cuntada iyo Lacagta cadaanka** **Your Cash and Food Assistance Rights and Responsibilities**	MAGACA MACMIILKA (MADAXA QOYSKA) LAMBARKA KAARKA AQOONSIGA MACMIILKA

Mas'uuliyadahaaga (Waa In Aad)

- **Na siisaa xogta aan u baahanahay si aan u go'aamino haddii aad u-qalantid.**
- **Na siisaa cadeyn marka loo baahdo.** Waxaa laga yaabaa in aan kuu soo helno. Xogta aad siisid waaxda waxaa ku waajibta xaqiijinta saraakiisha gobolka iyo kuwa dowladda dhexe. Xaqiiqsashada waxaa ka mid noqon kara xiriiryada la socosho ee shaqaalaha waaxda oo ay ku jiraan baarayaasha been-abuurka.
- **Xogta loo sheego Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada** waxaa laga yaabaa in ay saameyso u-qalmitaanka caynsanaanta daryeelka caafimaadka oo ay maamulaan Maamulka Daryeelka Caafimaadka iyo Isdhaafsiga Dheefta Caafimaadka.
- **Isbedalada warbixinta** (tusaale cinwaanka, dakhliga, iwm.) sida la isaga baahan yahay WAC 388-418-0005. Soo sheeg 10[ka] bisha xigta.
- **Wadashaqayn la yeelatid Qaybta Taakulaynta Ilmaha (DCS) haddii aad oggolaatid deeqda TANF**. Waa in aad ku caawisid DCS in ay caddayso, dib u habayn ku sameyso, ama ay meelmariso taakulynta ilmo ee loogu talagalay cunuga(carruurta) ee daryeelkaaga ku jira, ayna caddayso aabbonimada (haddii ay daruuri tahay). Waxaad diidi kartaa in aad wadashaqayn la yeelatid DCS Haddii aad muujin kartid in aad haysid sabab wanaagsan ee lagu aamini karo in wadashaqaynta aad la yeelanaysid DCS dhigayso adiga, carruurtaada, ama carruurta daryeelkaaga ku jira halis waxyeello oo kaga imaanaya waalidka aan ilmaha hayn.
- **Codsatid aadna sameysid dadaal suurtagal ah** oo looga helayo dakhli suurtagal ah ilaha kale marka aad wayddiisatid ama aad heshid gargaarka lacagta cadaanka ah.
- **Dhammeystirtid warbixinada iyo dib-u hubinada loo baahan yahay.**
- **Raacdid shuruudaha shaqada** ee loogu talagalay gargaarka cuntada iyo gargaarka lacagta cadaanka ah.
- **Noo sheegtaa** haddii aad doonaysid qof kale in uu isticmaalo gargaarkaaga cuntada asagoo adiga ku matalayo.
- **Wadashaqayn la yeelataa dib-u hubinadeena Xakameynta Tayada.**
- **U isticmaashid gargaarka cuntada** kaliya in aad cunto ugu soo iibisid xubnaha qoyska.
- **U isticmaashid gargaarka lacagta cadaanka ah** kaliya faa'iidada xubnaha qoyskaaga.
- **Waa in aad bixisaa Lambarada Damaannada Bulshada** (SSN) ama aqoonsiga socdaalka ee kaliya dadka codsanaya gargaarka. Haddii aad dooratid in aadan bixinin SSNyada ama aqoonsiga socdaalka ee xubanaha qoyska ee aan codsaneynin, dhammaan dakhliga iyo ilaha xubnaha qoyska waa in wali la xaqiijiyaa, haddii loo baahdo, si loo go'aamiyo u-qalmitaanka.

Xuquuqahaaga (Waa In Aan)

- **Oggolaanaa codsi** la socda magacaaga, cinwaankaaga, iyo saxiixaaga ama saxiixa wakiilkaaga idman.
- **Kugu caawinaa buuxinta foomamka DSHS.**
- **Socod siinaa** codsigaaga ee loogu talagalay gargaarka cuntada 7 maalmood gudahooda haddii aad u-qalantid adeegga degdega ah.
- **Ku siino rasiid** haddii aad mid waydiisatid marka aad keentid dukumeentiyo.
- **In aan ku siino go'aan qoran,** xaaladaha badankooda, 30 maalmood gudahooda.
- **Waxaad diidi kartaa in aad la hadashid baaraha Oggaanshaha Waqtiga hore ee Been-abuurka** (FRED) oo ka socda Xafiiska Been-abuurka iyo La Xisaabtanka. Ma aha in aad u oggolaatid baaraha in uu galo **gurigaaga**. **Waxaad** waydiisan kartaa baaraha in uu soo noqdo waqti kale. Tani ma saameynayso u-qalmitaankaaga ee gargaarka.
- **Waxaad waydiisan kartaa dhageysi maamulka la xiriira** haddii aad diidid go'aanka ay waaxda ka qaadanayso dacwadeyda. Waxaad sidoo kale waydiisan kartaa korjooge ama maamule si ay dib-u hubin ugu sameeyaan go'aanka ama talaabada la isku khilaafsan yahay ayagoon saameynin xuquuqahaaga ee dhageysiga maamulka.
- **Waa in aan kugu wargelinaa** sharciga ku xaddidan waqtiga 60-bilood ah ee hoos imaanaya Gargaarka Aan Joogtada ahayn ee loogu talagalay barnaamijka Qoysaska Baahan (TANF). Waqtigan xaddidan looma adeegsan karo kaalmooyinkaaga daryeelka ilmaha, ama Cuntada Aasaasiga ah.

Waxyaabaha Aad Ka Oggaanaysid Kaarkaaga EBT

- **Si Qaldan u Adeegsiga Dheefaha:** Dheefaga lacagta cadaanka ah iyo kuwa cuntada ee lagu bixiyay kaarka EBT waxay siinayaan DSHS taariikhda macaamilka ganacsi ee meesha aad ku isticmaashey dheefahaaga. Waaxda waxay u isticmaalaysaa xogta macaamilka ganacsi baaritaanada si qaldan u adeegsiga dheefaha gargaarka lacagta cadaanka ah ama ku badelashada dheefaha gargaarka cuntada lacag cadaan ah ama walxaha kale ee qiimaha leh (suuqa madow)
- **Bedelaadda kaarka EBT:** Waxaa laga yaabaa in aan ujro kaaga qaadno bedelaadda kaararka EBT. Ka dhig kuwa badbaadsan oo bedqaba kaarkaaga EBT iyo lambarkaaga aqoonsiga shaqsi ahaaneed(PIN).
- **Kaararka EBT ee Baaqiga Badan Ku Jira:** Haddii aadan isticmaalin dheefahaaga bilo hal waqti ama baaqi badan uu isku uruuro dhawr bilood kadib, waxaan kula soo xiriiraynaa si aan dib-u hubin ugu sameyno xaaladaada ama baahidaada dheefaha.

Waxyaabaha Aad Ka Oggaanaysid (Cuntada Aasaasiga ah)

- **Uma dirno xogta** ku saabsan shaqsiyaadka codsanaya Cuntada Aasaasiga ah wakaaladaha kale ee dowladda dhexe si loo eego in xogta ay saxan tahay. Haddii wax xog ah ay khaldan yihiin, shaqsiyaadka codsanaya waxaa laga yaabaa in aysan helin Cuntada Aasaasiga ah. Haddii shaqsi uu bixiyo xog ay og yihiin in ay qaldan tahay, waxaa lagu soo oogi karaa dembi. Ciqaabaha loogu talagalay marka si ula-kac ah loo jebiyo sharciyada Cuntada Aasaasiga ah waxay ku kala duwan yihiin u-qalmi la’aanta barnaamijka, ilaa ganaax, ama xabsi dhigid suurtagal ah.
- **Haddii aad iibisid, aad isku daydid in aad iibisid, wax ku badelatid ama aad ku tabarucdid gargaarkaaga cuntada** wax qiimo leh sida lacag cadaan ah, daroogo, hub, ama wax kale oo aan ahayn cunto laga helay tafaariiqle idman (suuqa-madow), waxaad u-qalmo wayn kartaa in aad heshid dheefaha gargaarka cuntada ee loogu talagalay muddada ugu yar ee ah hal sanno ilaa muddada ugu badan ee ah u-qalmi waayid cimri ee dambiga ama gefka ugu horeeya. U-qalmi waayidan way soconaysaa xataa haddii aad ka tagtid gobolka Washington aadna ka ka codsatid dheefo gobolo kale.
- **Haddii lagaa doonayo in aad ka qaybqaadatid shaqada la isaga baahan yahay Cuntada Aasaasiga ah,** aadna ku guul dareysatid in aad ka qaybqaadatid, waxaad u-qalmi waynaysaa hal bil iyo ilaa aad ka cadeecdid shaqada la isaga baahan yahay guuldarada ugu horreysa; seddax bilood iyo ilaa aad ka cadeecdid guuldarada labaad; iyo lix bilood iyo ilaa aad ka cadeecdid marka seddaxaad iyo waqti kasta markaaas kadib.
- **Waxaa lagaa saari karaa barnaamijka Cuntada Aasaasiga** ee loogu talagalay jabinta sharciga barnaamijka Cuntada Aasaasiga ah sida lagu sharxay digniinta ciqaabta Cuntada Aasaasiga ah ee lagu qoray boggan.
- **Waa in aad soo sheegtid kharashaadyada qoyska haddii aad doonaysid in waaxda ay ku darto kharashaadyadan ee loogu talagalay Cuntada Aasaasiga ah.** Haddii aadan soo sheegin aadna keenin cadeynta kharashaadyadan, markaasi waxaad sheegaysaa in aadan doonaynin in aan isticmaalno kharashaadyadan si aad u go’aamisid haddii aad heli kartid Cunto Aasaasi ah oo badan.

Waxyaabaha Aad Ka Oggaanaysid (Lacagta Cadaanka ah)

- **Helidda aad helaysid Gargaarka Aan Joogtada Ahayn ee loogu talagalay Qoysaska Baahan (TANF)** waxaad u xilsaareysaa cunugaaga iyo xuquuqahaaga taageerada lamaanaha Qaybta Taakulaynta Ilamaha. Tani waxaa loola jeedaa in DCS ay kaa goynayso taakulaynta laguugu leeyahay, ilaa tirada taageerada dadweynaha ee aad qaadatey. **Waa in aad si degdeg ah ugu sheegtid DCS haddii aad heshay lacag-bixinada taakulaynta ilmaha ama dheefaha** loogu talagalay cunuga inta aad ku jirtid TANF.
- **Haddii aad joojisid helidda TANF** waa in aad u sheegtid DCS wixii ku saabsan isbadel kasta ee saameynaya taakulaynta ilmaha, sida ilmaha guuray ama cinwaankeyga oo isbadelay.
- **Haddii aad heshid TANF**, **waxaad waydiisan kartaa lacag dheeraad ah** si aad caawimaad ugu geysatid bixinta kharashaadyada guryaynta degdega ah ee aan joogtada ahayn.

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha shacabka Dowlada iyo Wasaarada Beeraha ee Mareykanka (USDA) xeerarka xuquuqaha iyo siyaasadaha, Wasaarada Beeraha ee Mareykanka, Wakaaladaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaha, iyo hay'adaha kaqayb qaadanaya ama maamulaya barnaamijyada Wasaarada Beeraha ee Mareykanka waa kuwo ka mamnuuc ah midab takoor kusalaysan jinsiyada, midabka, asalka dhallashada, diinta, nooca, aqoonsiga nooca qofka (ay kujirto muujinta nooca qofka), jiheyn galmo, naafonimo, da'ada, xaalada guurka, xaalada qoyska /waalidnimo, dakhli-laga helo barnaamijka caawimaada dadweynaha, waxyaabaha uu qofku rumeysanyahay siyaasad ahaan, ama aargoosi ama aarsasho kahoreysa waxqabadka xuquuqaha shacabka, barnaamij kasta ama waxqabad kasta oo laqabto ama laga maalgeliyo dhinaca Wasaarada Beeraha ee Mareykanka (ma ahan dhammaan asalada kuwo khuseeya barnaamijyada oo dhan). Waqtiyada fayl dirida kusaabsan cabashooyinka iyo sixitaanada waa kuwo ku kala duwan barnaamijka.

Dadka qaba naafooyin kuwaas oo u baahan qaabab bedelaad ah oo xiriir kusaabsan ee loogu talogalay macluumaadka barnaamijka (tusaale ahaan., Qoraalka dadka indhoolaha ah, qoraal weyn, cajalad ladhagaysto, Luuqada Dadka Indhoolaha ah ee Mareykanka, iwm.) ayay khasab tahay in lagula xiriiro Wakaaladaha masuulka ah ama in lagala xiriiro Xarunta TARGET ee Wasaarada Beeraha ee Mareykanka lambarkan (202) 720-2600 (codka iyo TTY) ama kala xiriir Wasaarada Beeraha ee Mareykanka tooska Adeega Xoojinta Dowlada lambarkan (800) 877-8339. Intaas waxaa sii dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado kale oo aan ahayn Luuqada Ingiriisiga.

Si aad u dirtid cabasho kusaabsan barnaamijka, buuxi Foomka Cabashada Midab takoorka Barnaamijka Wasaarada Beeraha ee Mareykanka. AD-3027, waxaa sitoos ah looga helayaa boggaan internetka http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html iyo xafiis kasta oo kamid ah xafiisyada Wasaarada Beeraha ee Mareykanka ama u qor warqad cinwaanka Wasaarada Beeraha ee Mareykanka kuna sheeg warqada dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. Si aad u codsato nuqul kusaabsan foomka cabashada, wac lambarkan (866) 632-9992. Kusoo gudbi foomkaaga la buuxiyay ama warqada cinwaanadaan soo socda:

1. Boosto: U.S. Department of Agriculture
   Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
   1400 Independence Ave, SW
   Washington, D.C. 20250-9410;
2. Faakis: (202) 690-7442; or
3. Iimayl: program.intake@usda.gov

Wasaarada Beeraha ee Mareykanka waa fursad lamid ah bixiyaha, loo shaqeeyaha, iyo amaahiyaha.

Saxiixidda aad saxiixaysid hoose, waxaan sheegayaa in aad helay xuquuqaheyga iyo mas'uuliyadaheyga ee ku saabsan helidda dheefaha DSHS iyo barnaamijyada la ii sharxay. Waxaan fahansanahay haddii aan diido in aan saxiixo dukumeentigan ma saameynayso u-qalmitaankeyga balse waxaa wali mas'uul ka ahay waxyaabaha la isaga baahan yahay barnaamijka iyo waxaad ku xiran tahay barnaamijka ama ciqaabaha dambiga ee la adeegsan karo.

SAXIIXA CODSADAHA	TAARIIKH	SAXIIXA WADA-CODSADAHA	TAARIIKH

AQOONSIGA ACES SHAQAALAHA DSHS:

☐ Diiday in uu saxiixo.